



TILMAAMAH K

XISAABTANKA IYO WARBIXINTA WAREEJINTA LACAGTA EE LA XIDHIIDHA GARGAARKA MILITARIGA

1. Awoodda, Hadafka & Baaxadda

- 1.1 Tilmaamahan waxaa la soo saaraa iyado laga ambaqaadayo Qeybta 20, Faqradda 3 ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud [2017].
- 1.2 Hadafka Tilmaantan waa in la soo koobo xisaabinta, warbixinta iyo soo iibsiga nidaamyada la xidhiidha \$1 milyan oo maaliyadeed oo ay bixise Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) sanadka 2017, oo si gaar ah loogu qoondeeyey Qaar Caawin Milatari.

2. Xisaabteynta Bixinta

- 2.1 Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay soo saartay tilmaamo khaas ah oo la xidhiidha sida loo isticmaalayo maaliyadahan. Lixda (6) qaybood ee kharashka lagu isticmalayo ayaa lagu qeexay Lifaaqa 1aad.
- 2.2 Si loogu oggolaado warbixinta daahfuran iyo diiwaangelinta miisaaniyaddan iyo kharashaadka la xiriira lambarka mashruuca, waa in lagu dhiso FMIS oo cinwaankeedu yahay "Gargaarka Milatari ee DFS" ee Wasaaradda Amniga. Tani waxay hubin doontaa in warbixinnda laga soo saari karo kharashaadka militariga, iyo sidoo kale inay kala soocaan kharashyada aan caadiga ahayn ee Dowlaad Goboleedka **Hirshabelle** kharashyada caadiga ah ee hawlalka. Xeerarka xisaabtanka miisaaniyadda ee la xidhiidha kharashyadaas gaarka ah ayaa sidoo kale lagu qeexay Lifaaqa 1aad.

3. Wareejinta Kharashka Miisaaniyadda laxiriira Gargaarka Militariga

3.1 Miisaaniyad dheeri ah ayaa looga baahan yahay in Baarlamaanka uu ansixyo si loo helo kharashka miisaaniyadda. Wasaaradda Maaliyadda ayaa si dhakhso leh u bilaabi doonta.

4. Isticmaalka wax soo iibsiga DFS ee maalgalin lacageed

4.1 Siyaasadaha soo iibsiga ee Dowlaad Goboleedka **Hirshabelle** waa in loo hoggaansamaa marka soo iibsiga alaabooyinka iyo adeegyada ay maalgeliso lacagaha kaimanaya DFS. Si kastaba ha noqotee, marka la eego nooca kharashka, wax soo iibsiga oo kaliya ayaa loo isticmaali karaa, isagoo xaq u leh xaalado aan caadi ahayn iyada oo la raacayo Siyaasadaha Soo iibsiga iyo Nidaamka Hannaanka, Qaybta 4.25.4. Qoraal caddayn oo keliya (QCK) waa in loo diyaargaroobaa isticmaalka qaabkan soo iibsiga iyadoo la adeegsanayo maalgelinta DFS. Fadlan la tasho Agaasimaha Waxsoibsiga ee Wasaaradda Maliyada inu idinku caawiyo diyaarinta dukumintiyada lagama maarmaanka ah.

Lifaaqa 1aad - Qaybaha Kharashka ee Maalgalinta Caawinaada Militariga

Ministry/Agency		Account		Budget
Code	Name	Code	Name	
16	Ministry of Security	211105	Security Forces (Police, Intel Forces and Prison)	270,000
		211201	Regular Food Provision	270,000
		222301	Gasoline	100,000
		222405	Securiy Operational Allowance	200,000
		222501	Maintenance of Equipment	100,000
		273201	Medical Treatment	60,000
16				1,000,000